Bundesministerium
Bildung

Ka-qaybgalka Waajibka ah ee ilmahaaga ee dugsiga xagaaga 2026 – Macluumaad iyo Diiwaan-gelin

Xeerka sharciga iyo waajibaadka

Ka qaybgalka ilmahaaga ee dugsiga xagaaga waxa uu ku salaysan yahay xeerarka sharciga ah ee waajibaadka ka qaybgalka ardayda waxbarashada dadban. Sidaas darteed, ka qaybgalka waa waajib waxaana loo arkaa qayb ka mid ah waajibaadka dugsiga.

Waqtiga, saacadaha casharka iyo goobta

Dugsiga xagaaga waxa uu dhacayaa laga bilaabo 31. August ilaa 11. September 2026 Isniin ilaa Jimce, subax kasta laga bilaabo 08:00 ilaa 12:00 duhurnimo. Goobta dugsiga xagaaga ee la qoondeeyay waa la soo sheegi doonaa waqti ku habboon.

Mawduucyada iyo hababka waxbarashada

Dugsiga xagaaga waxa uu bixiyaa taageero gaar ah oo ka caawinaysa ilmahaaga inuu barto afka Jarmalka iyo inuu ku tababarto luqadda. Macallimiinta iyo ardayda waxbaranaysa waxay xoojinayaan xirfadaha luqadda iyo barashada ilmahaaga, si uu si wanaagsan oo kalsooni leh ugu bilaabo sanad dugsiyeedka cusub.

Gaadiidka iyo Imaantinka

Fadlan hubi in ilmahaagu si joogto ah oo waqtigeeda ah ugu yimaado dugsiga xagaaga. Macluumaadka diiwaangelinta waa tigidhka baska iyo tareenka ee u dhexeeya gurigaaga iyo dugsiga. Haddii aanay jirin xidhiidh bas ama tareen oo ku habboon, fadlan u sheeg maamulka dugsiga. Maamulka dugsiga waxa uu warbixintaada u gudbin doonaa waaxda waxbarashada, taas oo ku salayn doonta shuruucda bilaashka ah ee ardayda ku heli kaaan.

Waajibka joogitaanka iyo cudurdaarka

Ka qaybgalka waajibka ah waxay ka caawisaa ilmahaaga inuu fahmo casharrada la bixin doonosanadka soo socda isla markaana si wanaagsan ugu diyaar garoobo. Sidaas darteed, ilmahaaga waa waajib ku ah inuu joogo. Ka maqnaanshaha aan sababta lahayn ee Ardayga Dugsiga waajibka ah leh waxaa loo arkaa jaibinta Sharciga Dugsiga, taas oo ay maamulka Dagmada ku ganaaxi karaan ilaa 800 €

Xogta shaqsiga ah

Xogta shaqsiga ah waxaa loo isticmaalaa oo keliya ujeeddooyinka qorsheynta, fulinta iyo dukumentiga iyadoo la raacayo xeerarka ilaalinta xogta.

Xiriirka iyo Qofka Loo Laabanayo

Su’aalaha guud, fadlan la xiriir maamulka dugsiga ee dugsigaaga asalka ah.

Waxaan aqbalayaa macluumaadka isdiiwaangelinta ee dugsiga xagaaga waxaana xaqiijinayaa ka qaybgalka ilmahayga. Habaynta xogta loo baahan yahay ee isdiiwaangelinta waxaa loo sameeyaa sida waafaqsan xeerarka dugsiga ee BMB, BKA, maamulka waxbarashada ee ku habboon iyo – haddii loo baahdo – xafiiska canshuuraha ee ku habboon. Waxaan oggolahay in xogtayda xiriirka loo isticmaali karo in lagu diro email xasuusin ah oo ku saabsan dugsiga xagaaga.
Saxiixayga waxaan ku xaqiijinayaa in aan akhriyay oo fahmay macluumaadka.